

Kaamirooyinka Talefeshinka ee Isku Xiran

Seattle Police Department

Waa maxay Tignoolojoiyda?

Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliska ee Seattle) ayaa soo jeedinayo nidaamka kaamirooyinka talefishinka (CCTV) si looga caawiyo yareynta iyo helista falalka danbiyada. Nidaamyada kaamirada ee CCTV ayaa la doonaya in lagu rakibo aagag gaar ah oo rabshada hubaysan, tahriibinta dadka, iyo danbiyada jariimada joogtada ah ay ka dhacaan. Kaamirooyinka ayaa loo jeedin doonaa dhanka wadada, geesaha wadada, iyo aagaga kale ee dadwaynaha boorar ayaana lagu dhajin doonaa si loo caddeeyo in kaamirooyin meesha ku xiran yihiin. Nidaamyada amaanka gaarka loo leeyahay ayaa sidoo kale muuqaallada tooska ah ee goobaha dadwaynaha la wadaagaaya SPD.



Maxaan u isticmaaleynaa qalabka casriga ah?

Nidaamyada kaamirooyinka CCTV ayaa ka caawin doona baareyaasha uruurinta caddeynta la xiriirta danbiyada xunxun ee dagaalka, ayna ku jiraan kuwa dilka, weerarada iyo danbiyada kale ee jariimada ah. Nidaamka CCTV ayaa ka caawin kara baareyaasha aqoonsiga eedaysaneyaasha, fasixida dadka bilaa danbiga ah, iyo ka sifaynta hubka dilaaga ah wadooyinka, taasoo yareynaya khatarta waxyeellada ku dhacysa dadwaynaha.

Waqtiga ay furan yihiin fikradaha dadwaynaha ee ku aadan qalabkaan ayaa hada socda. Wuxaa faallooyin ku bixin kartaa [Seattle.gov/Surveillance](https://seattle.gov/Surveillance).

Faallooyinka dhammaan waxaa lagu dari doonaa Surveillance Impact Report (Warbixinta Saameynta Dabagalka) ee qalabkan waxaana loo gudbinayaa Dawlada Hoose.

Haddii aad jeelaan lahayd inaad bixiso jawaab celin xili ka baxsan xiliga u furan faallooyinka, fadlan si toos ugu dir Dawlada Hoose adoo adeegsanaaya iimaylka ah <https://seattle.gov/council>.

Uruurinta

Xogta CCTV si ku meel gaar ah ayaa loogu xareeyaa nidaamka ugu badnaan 30 maalmood ilaa in ay ku jirto maahee cadeynta danbi markaas oo lagu hayn doono nidaamka kaydka caddeynta ee elektarooniga ah ee SPD. [Xeerka SPD 7.010](#) ayaa maamula gudbinta cadeynta una baahan in dhammaan cadeynta lasoo uruuriyay lagu diiwana gasho General Offense Report (Warbixinta Guud ee Danbiyada).

Isticmaalka

Ujeedada barnaamijka tijaabada ah ee CCTV waa in la yareeyo hoos u dhacyada ciidanka iaallada iyo baaritaannada ayadoo la adeegsanaayo tignoolojoiyadaha leh caddeynta kuna habboon marxaladaha taagan si loo yareeyo loona baaro habdhqaanka danbiyada joogtada ah, rabshadaha hubaysan, tahriibinta dadka ee goobaha gaarka ah oo danbiyadu ka dhacaan. Aagaga la qorsheeyay in lagu sameeyo waa Aurora Avenue North, Belltown, Chinatown-International District, Stadium District, Garfield High School, the Capitol Hill Nightlife District, and the Downtown Commercial Core.

Ilaalinta Amniga Xogta

Si loo yareeyo ciladaha xog uruurinta, kaamirooyinka CCTV ayaa la rakibi doonaa si ay u uruuriyan dhacooyinka ka dhacaaya meelaha dadwaynaha oo sharcyan aysan jirin waxyabo sir ah oo qofku muujinaayo.

Muuqaallada CCTV duubaan ayaa si otomaatig ah loo tirayaa 30 maalmood kadib ilaa in muuqaalka loo duubay maahee cadeynta baaritaanka danbiga. Waxaa intaas dheer, nidaamyada kaamirada ee CCTV ayaa hayn doona diiwaanka xogta kaasoo uu eegi karo marka uu dodo Office of the Inspector General for Public Safety (Xafiiska Hoganka Guud ee Badqabka Dadwaynaha).



City of Seattle